AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Gurisiinta

Hoygaaga bilowga hore wuxuu noqon karaa mid ku-meel-gaar ah dhowrka asbuuc oo ugu horreeya Australia. Qofka caseworkerkaaga ama proposerkaaga ayaa hoygaas kuu diyaarin doona. Waa inaad raadsataa hoyga muddada dheer ama joogtada ah muddo lix bilood ah ka dib markaad timaaddo Australia. Waxaad ka raadsan kartaa hoyga adoo u maraya real estate agencies, qofka caseworkerkaaga ah, ama proposerkaaga ama saaxiibkaaga ah.

Magaalooyinka waaweyn iyo kuwa yaryar ee Australia waxaa ka jira noocyo kala duwan ee gurisiin ah oo u kala dhaxeeya abaatmentiyo hal-qol ah ilaa guryaha waaweyn. Abaartmentiyada baloogyada dhaadheer guud ahaan waxaa laga helaa magaalooyinka waaweyn, sidii ayagoo ah dhismeyaalka townhouse-ka oo waaweyn. Xagga xaafadaha, guryaha yunidka ah, guryaha waaweyn iyo kuwa yaryar dhammaan way ka siman yihiin marka dadka ku nool magaalooyinka miyiga oo yaryar waxay ku nool yihiin guryaha beerta ku dhex-yaal ama mundullada.

Guryaha Australia ku yaal waxay badanaa leeyihiin jiko, qolka fadhiga, musqusha-qubayska, loondariga iyo dhowr qol oo kale. Musqusha-qubayska badanaa waxay leedahay shaawarka mararka qaarkoodna waxay leedahay bathtubka. Musqusha waxay noqon kartaa qol yar oo gooni ah ama waxay noqon kartaa isla-qol sida musqusha-qubayska.

## Kireysiga

Waxaad u baahan doontaa inaad kireysato hoyga si aad ugu noolaato. Kirooyinka magaalooyinka Australia waa kuwo qaali ah waxaadna masuul ka noqonaysaa inaad lacagta kiradaada bixiso ayadoo ay ku caawinayso caawimaadda dowladda ee (Centrelink) ama dakhliga kaasoo gala shaqadaada. Nooca iyo baaxadda guriga aad ku nooshahay wuxuu ku xirnaan doonaa magaalada, meesha uu magaalada uga yaalo iyo waxaad awooddo inaad ku bixiso kirada. Guri ka raadsashada meelaha bartamaha magaalo-weynta ka fog iyo xaafadaha iyo magaalooyinka gobolada badanaa waa waaweyn yihiin waana raqiis.

Ka hor intaadan ku soo guurin, waa inaad bixisaa lacagta kirada ee bisha hore oo horumaris ah iyo **dhigaalka kirada** iyo sidoo kale heshiiska kireysiga oo saxiixan.

Dhigaalka kirada waa lacag-bixin hal-mar ah (badanaa waa kirada bishii). Dhigaalka kirada waa dhigaal ammaan bal haddii aad waxyeesho hoyga ama aad ka guurto ka hor waqtigii lagu heshiiyey. Lacagtaas waxaad dib ugu heli doontaa markaad guriga ka guurto haddii aadan wax waxyeelo ah ugaysan guriga ama aadan jebin heshiiskii kireysiga. Waxaad xaq uyeelan kartaa caawimaad inaad bixiso dhigaalkii kirada. Weydii qofkii Caseworkerkaaga ah ama wakiilka adeeggyada hoyga wixii talooyin ah.






Waa inaad soo buuxisaa **warbixinta xaaladda** guriga ka hor intaadan ku guurin hoyga. Taas waa diiwaanka xaaladda hoyga iyo waxa ku-yaal ka hor intaadan ku soo guurin. Waxaa la filayaa in markii aad ka guurto guriga inaad uga guurto xaallad la mid ah siday ahayd markaad ku soo guurtey. Haddii ay sidaas tahay, waxaad heli doontaa dhigaalkii kirada oo laguu soo celiyo.

Si aad guri u kireysato waa inaad saxiixdaa **heshiiska** kirada ee hoygaaga. Heshiiska kirada waa dokumanti sharci ah oo u dhaxeeya adiga – **kireystaha** – iyo milkiilaha guriga – **milkiilaha**.

Heshiiska kirada wuxuu ilaalinayaa milkiilaha iyo kireystahaba asagoo sheegaya inta kiradaadu tahay, markaad dhiibayso iyo intay le'egtahay muddada aad deganaanayso guriga. Heshiiska kiradu wuxuu kaloo sheegayaa cidda bixinaysa **biilasha**, sida korantada, biyaha, gaaska, taleefanka iyo adeegyada kale.

Waa masuuliyaddaada inaad waqtigeeda ku bixiso lacagta kiradaada iyo biilashaada – haddii kaleeto adeegyadaas waa lagaa joojinayaa ama, haddii aad la dib-dhacdo bixinta kiradaada, waxaad khatar u galaysaa in lagaa saaro guriga.

Milkiiluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu baaro hoyga intaad ku nooshahay. Waqtiyada **baarista** badanaa waxaa lagu sheegaa heshiiska kirada. Milkiiluhu wuxuu baari doonaa inuu bal eego inaad xafidayso guriga iyo jardiinka oo ka dhigayso kuwo nadiif ah oo bilicsan, iyo inaan waxyeelo jirin.

Haddii aadan xafidin guri bilicsan oo nadiih ah, derisyadaadu way kaa soo cabanayaan ama waxaa kaa saari kara milkiilaha.

## Waajibaadka kireystaha

- Waqti ku-bixinta lacagta kirada
- Daryeelidda guriga ama yunidka
- U-soo-sheegidda wixii waxyeello ah milkiilaha
- Helidda ogolaansho ka hor intaan wax isbaddalo ah lagu samayn guriga ama abaartimentiga
- Siinta ogaysiin ku filan, badanaa ilaa afar asbuuc ah, milkiilaha ka hor intaadan ka guurin guriga
- Hubinta in tiradii deganeyashu ahaato mid ku sugan xadka sharciga ah. Inaysan dhicin wax hoos-kasii-kireyn ah guriga ama keenidda dad booqdeyaal mudda dheer ah
- Inaad tixgeliso derisyadaada
- Haysashada risiidhada iyo dokumantiyada la xiriira kireysiga lacala haddii ay dhacdo wax muran ah oo kireysiga la xiriira
- Bixinta wixii ganaaxyo ah maaddaama aad ka guurtey ka hor intuusan dhammaan heshiiskii kirada.






## Waajibaadka milkiilaha

- Siinta ogaysiin habboon hadday dhacdo wax korodhka lacagta kirada ah
- Siinta ogaysiin habboon hadday dhacdo wax guri-ka-saaris ah
- Ku-samaynta dayactirka markii loo baahdo iyo waqtigeeda
- Siinta ogaysiin habboon haddii milkiilaha ama wakiilkooda uu doonayo inuu soo-galo gurigaaga wixii baaris ah ama sabab kale ah
- Soo-celinta dhigaalkaagii kirada haddii xaaladaha heshiiskii kirada ay dhan yihiin.

## Ammaanka

- Mar kasta xir albaabadaada iyo daaqadahaaga
- Mar kasta dami istoofkaaga markii aadan wax ku karinayn
- Hubi alaamyada dabka inay shaqaynayaan – ka-baddal batariyada si joogto ah (lix dii bilowd oo kasta).

## LIISKA-HUBINTA GURISIINTA

**U-adeegso liiska-hubinta si aad u hubiso in waayo-aragnimadaada kirada ay tahay mid wacan**

☐ Baro aagga aad kunooshahay oo ogsoonow **dugsiyada, gaadiidka iyo dukaamada** ku yaala gurigaaga ama falaadkaaga agtiisa

☐ Ogsoonow **muddada** kireysiga

☐ Ogsoonow intay le'egtahay **lacagta kirada aad bixin doonto,** intay tahay iyo markay joogto waqtigii lagu bixinayey

☐ Ogsoonow qiimaha aad u bixinayso **debaajiga** ahaan (badanaa waa kiro afar asbuucah)

☐ Ogsoonow haddii ay jiraan wax ganaaxyo ah haddaad **ka guurto** ka hor intuusan dhammaan heshiiskii kirada

☐ Ogsoonow **waajibaadka** milkiilaha iyo kireystaha

☐ Diyaarso in laguu xiro **adeegyada lagama maarmaanka ah** (biyaha, gaaska, taleefanka)

☐ Kormeer **carruurtaada**

☐ Kawarqab haddii **xayawaano** aad leedahay

☐ Ka-dhig gurigaaaga iyo jardiinkaaga kuwo bilicsan oo **nadiif** ah

☐ Ka-dhig **qaylada** mid heer hoose ah si aadan u-dhibin derisyadaada

☐ Ku rid **qashinka** biinanka qashinka waxyaalaha dib-loo-farsameeyana ku rid biinanka dib-u-farsamaynta.






Boggan si ula kac ah ayaa loo baneeyey

Australian Government

Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee
Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda
Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM